# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:39 AM** | **Hansard No.25/4** | **Kal-fadhiga 25aad**

***Fadhiyadii 17 iyo 18aad 15,14/09/2014***

### Dooda Xeerka Hay'adda Dhowrista Tayadda oo socotey 2 cisho ayna ka qeyb-galeen 6 mudane.

1. **Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** Shir-gudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, bacda salaam, anigu waan taageeri jiray shariikaadka wadaniga ah alxamdulillaah way inoo furmeen oo waxaa ay yareeyn in lacag hard currency ahi dibada inooga baxdo sidaa ayaanan u dhiiri galin jiray .

   Shalay waxaan soo ururiyay dhayr shirkadood oo kuwa biyaha soo saara ah oo dalka ka soo baxa, sida aan ka warqabnana waxaan ka hadlaynaa waa quality control waana wadamada aduunyada oo dhan wax ka hir galay oo aan aad ugu baahanay, waana mid loo baahan yahay in la eego in la hubiyo caafimaad kooda iyo wax yeelada ay gaysan karaan waayo quraaradahaa aan soo ururiyay dhamaan tood kuma taalo wakhtiga ay soo bexeen iyo wakhtiga ay dhacayaan oo waxaa ku qoran best before 12 months from the date of production.

   Markaa waxaa weeyaan xilima ayay ka bilaabmaysaa xilima ayayse ku dhamaanaysaa waayo wakhti badan ayay kuu oo li kartaa, waanan in dadka caafimaadkooda laga war hayaa, hadaba nimanka aan sidaa u dhiiri galin jiray anan rabay in ay inoo badbaadiyaan lacagtaa adeg ee inaga baxaysa ayaa sidaa wax u khiyaamaynaya.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - In Xeerkan shuruudo adeg loogu xidho lana ansixiyo ayaan jecelahay, waad mahadsantihiin.

2. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** Dhamaan waad salaaman tihiin gudoomiye sida uu sheegay xildhibaankaa iga horeeyay meelaha ugu mihiimsan ee aduunku siiyaa awoodaha waa quality control ka inaga waxaa weeyi qofka looga

dhigayaa madaxda waa maxay aqoontiisu waa maxay capability giisu taasi waa kaw.

Inaga Qaabka aan dadka u magacawnaa waa beelo ama hebal shaqo ku sii laakiin waa sida dhakhtarka oo kale oo nin aan waxba qali aqoonini dee qaliin ma galo, ee waa reer hebel baa shaqo la'e ee inaga geeya hebal ayaan meesha taala, waayo cuntada inoo timaadaa cidka war haysaa ma jirto oo control ku samaysaa ma jirto, Anigu waxaan leeyahay xeerkaasi waa in uu noqdaa xeer adag oo qofka madaxda ka noqonayaya aqoon lagu doortaa.

Markaa aniga laba shay ayaan carabka ku adkaynayaan waa in wax kasta oo dalka soo galayaa ay yeeshaan maalinta ay soo bexeen iyo maalinta ay dhacayaan ta labaadna waa in Aqoon lagu doontaa qofka xilka loo dhiibayo. Tusaale ahaan jabuuti jaadka loo diraa quality control ayaa la mariyaa waayo waxaa ku baxayaa waa lacage, inagana waxaa ka inoo keenaa midba midka uu ka sii liito, lacag ayaana inaga baxda oo intaas oo milyan ayaa ku baxa oo maalin ayaa laga yaabaa in aan ku wada dhimano.

**Wanan leeyahay:-**

- Hay'addani waa in ay noqotaa mid balaadhan oo cuntooyinka iyo biyahaba ku shaqo leh oo eegta tayadooda (Quality) waan in sida aan hore u soo sheegay qofka looga dhigayo Madaxda Aqoon lagu doortaa, waanad mahadsan tihiin.

3. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Gudoomiyayaasha, Mudanayaasha iyo Saxaafadaba waan salaamayaa marka hore, waxaan u mahad naqayaa Gudidii soo diryaarisey Xeerkan Tayada iyo qodobada ay ka soo badaleen, Xeerkan oo ah qabyo qoraalka Xeerka Dhowrista Tayada waa xeer bulshadu aad ugu baahneyd, dhibatoyinka ugu badan ee laga hadlaana waa wax kasta oo dalka la keeno oo waxa laga saameeyo ay tayadeedu liidato, sidaa daraadeed xeerkii nidaamin lahaa ee lagu dhiqi lahaa haduu maanta Golaha horyaalo waa mid aad u mihiima.

Hadaan Xeerka Qodobadiisa u soo noqdo, **Ujeedada Xeerka** waxaad moodaa inaanu aad u faah-faahsaneyn, sida ka muuqata nuqulka qodobna malaha markaa inuu xeerka ka mid noqdo ayaan marka hore soo jeedinayaa oo laga dhigo **Qodobka 2aad**, marka labaadna inuu faah-faahsanaado ayaan soo jeedinayaa u jeedada Xeerka laga leeyahay taas oo aad moodaa in la is dhexgaliyo.

Qodobka Magaca Xeerka ee ku qoran Qodobka 1aad, waxaad moodaa in kalmadaha ingriiska ah la soo minguuriyay oo waxaa loo bixiyay Xeerka Heer Tayeedka iy Dhowrista Tayada, halka Gudidu Somaliland Quality Control Commission ay u badaleen Somaliland Quality Control Agency oo halkii Commissionka aheyd bay agency u badaleen, laakiin Cinwaankii ayaad moodaa in wali waxaad moodaa in khalkhal ka taagan yaahey, Markaa anigu Qodobka 1aad ee Magaca Xeerka waxaan odhan lahaa inuu Noqdo Xeerka Ilaalinta Tayada Qaranka oo aan u badali lahaa.

**Qodobka 2aad ee Erey bixinta** waxaa ka muuqata in ereyo badan oo runtii luuqad kale laga soo turjumey oo la somaliyeeyay, waxaa ka mid ah **"Shahaadeyn"** oo aan aheyn luuqad lagu istimaalo Xeerarka waxa loola jeedo iyo magaca kalmada shahaadeyna maaha waxa loola jeedo, waxaa sidoo kale taas la mid ah "**konteyna"** oo af-ingiriisi laga soo turjumey oo sidey aheyd loo qorey.

Iyana waxaad moodaa kalmada iyo waxa ku hor qorani inaaney is laheyn, sidoo kale kalmada "**agab"** oo somaliga waxa loo yaqaano wax ka duwan ay halkan ugu qoran tahey oo ah inay in loola jeedo shay kasta oo laga ganacsaado, markaa ashyaada laga ganacsado dee magacyay leeyihiin, qaab loola dhaqmaana way jiraan xeerarkana way ku qoran yihiin, markaa hadii la yidhaahdo waxkasta oo laga ganacsado la yidhaahdo agab dee bari waa la isku qabsanayaa, markaa taasna aad ha looga fiirsado ayaan odhan lahaa, waxaa sidoo kale ereyo badan oo sidaas oo kale ah oo sida loo isticmaalo iyo waxa lagu micneeyayba ay aad u kala duwan yihiin.

**Qodobka 4aad** ee Magac dhowga Komishanka ay ku qoran tahay marka nuqulka xeerka laga hadlayo, halka qodobka labadaad ee soo jeedinta Gudiddu wuu fiican yahay laakiin waa af-ingriisi waa in afsomaliyeeyo ayaa fiican, markaa inta la eego iyadoo somaliyaysan lagu qoro xeerka oo la qaato Commissinka iyo agencyga mid ahaan.

**Qodobka 7aad** ee Qaab-dhismeedka Gudidda, Gudidu waxay soo jeedisey in hay'ad laga dhigo, laakiin ma ay sheegin cidda magacaabaysa hay'adda, halka Xeerka nuqulka uu ku qoran yahay 7 xubnood oo kimishanka iyo cidda magacaabeysa, markaa hadii tan gudidda la qaadan lahaa may tilmaamin cida magacaabeysa iyo tiradooda, markaa hadii madaxweynuhu magacaabayo inay la cadeeyaan ayay aheyd, markaa anigu taas waxaan soo jeedinayaa in Sida Xeerka nuqulka la soo gudbiyay ee Qodobka 8**aad** ku qoran la qaato, haday Gudi farsamo yihiina waxay hoos iman doonaan Gudidda Qaranka.

**Qodobka 9aad,** Xilka iyo waajibaadka la siiyay Gudidda waxaad moodaa inuu aad iyo aad u yaryahey, heer tayeedka ay bulshadu u baahan tahay iyo sida ay

ugu baahan tahayna aad bay u badan tahay oo u balaadhan tahay, markaa taasina aad bay u kooban tahay ayaan odhan lahaa in kastoo aanan anigu ka soo gaadhsiin waxay u baahan tahay in la balaadhiyo.

**Qodobka 11[aad] ee** ku saabsan Shuruudaha Xubinmada waxaan ku dari lahaa oo aad moodaa inay halka ka maqan tahay aqoontii iyo jaamacada looga baahanyahey, markaa waa inay qodobkan ka muuqataa qofka xilkan qaadaya aqoonta looga baahan yahay, waxaa sidoo kale ka maqan xubnaha meelihii laga soo xulayay iyo sida loo soo kala xulayay, sidoo kale qaabka doorashaduna waxaad moodaa isna inaanu aad u cadeyn, markaa in xeerka lagu cadeeyo sida iyo meelaha laga soo xulayo iyo qaabka ay gudoonka u dooranayaan, anigu intaas ayaan ka gaadhsiiyay, waad mahadsantihiin.

**Point of Correction Md. Siciid Warsame:-** waxaa isku khaldanaa Commission iyo Hay'ad, waxaanu u yeedhnay hay'adii Xeerka ku shaqeyneysay markaa waxay yidhaahdeen Hay'ad buu madaxweynuhu Magacaabay ee Commission may aheyn halka Gudidda Farsamadana ma jiro Gudi oo waa Xubno farsamo oo ay hay'addu yeelaneyso waxaana soo magacaabaya hadaad akhrido Wasaarado ayay ka imanayaan kala ah Caafimaadka, Beeraha iyo Xoolaha markaa Gudiba maahee waa technical advisors.

4. **Md. Baar Siciid Faarax:-** Waxaan ku dari lahaa arrin hay'ad ha ahaato ama Gudiye dadkan la qorayo ee farsamada ah in lagu daro Ganacsatada oo cid masuula lagaga daro sababtoo ah waxaa dhaca maalin walba in caruurta laga soo iibiyo maalin walba Sharaab dhacey iyo waxyaalo kale, markaa hadii sharaabkii iyo cuntadii dhacdey ay dukaamadii yaaliin marka lagu qabto inta laga qaado ayaa la gubayaa laakiin wax ganaaxi ma jiraan dhibaatadey dadka u geysteen ee waxa dhacey ee aan la iska eegin ka iibiyeen wax ganaaxa ma jiraan, markaa in Ganaax lagu daro oo la adkeeyo ayaan soo jeedin lahaa.

5. **Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte):-** Marka hore Waan u mahadnaqayaa Gudidda ka soo shaqeeyay Xeerkan, wax ka badan ka odhan maayo Xeerka, ugu horeyn waxaan jecelahay inaan tilmaamo arrin dadku isku khaldaan oo aaney aheyn in la israaciyo taas oo ah arrinta ku saabsan Tayada Cuntada iyo Dawooyinka waa mid u baahan Caafimaad waxayna hoos timadaada Wasaarada Caafimaadka, hase yeeshee tayo marka laga hadlayo wax kasta tayo ayay leeyihiin oo sibidhku tayuu leeyahay, looxu tayuu leeyahey oo tayoadu waxyaabo badan bay khuseysaa.

Markaa waxaan soo jeedinayaa yaan la isku khaldin in tayada wax kasta gaar ugu baahan yahay oo ay tahay in Halbeegyo loo sameeyo wax kasta sida Construction oo kale waa industry gaar ah waana sibidhkii, qalabkii farsamada ee la galinayay, waayiradii lagu rakibayay iyo looxyadii oo kale, markaa waa in qalabkaa tayadiisa in mid go'an oo hadey tayadaa ka hooseeyaan aan la ogolaan inay dalka soo galaan, marka wax kasta oo kale sidaa halbeeg go'an loogu sameeyo.

Laakiin waxyaabaha ay ka mid tahay Cuntada iyo Dawoyinka waxaan qabaa inay hoos timaado Wasaarada Caafimaadka oo waax gaar ah oo wasaaradaas ah inta loo sameeyo la hoosgeeyo, waayo kama maaranto Caafimaad baan qabaa markaa waxaan soo jeedinayaa in aan wax kasta tayadooda aan laga dhigine ee Cuntada iyo Dawooyinka tayadooda gooni looga saaro oo Waax Wasaarada Caafimaadka ah la hoos geeyo Service gaar ahna loo sameeyo, waayo waxani waa wax technical ah oo laboratory gaar ah u baahan, Gudidda hay'addan Tayaduna waxay qaban karaan ma jiraan iyana hadaan National Laboratory System aanu jirin ay wax ku egaan, dalkana kama jirto wax laboratory ahi sheybaadho dadka lagu baadho mooyee.

Markaa waxani waxay u baahan tahay farsamo badan iyo lacag badan in la galiyo si loo ilaaliyo tayada Qalabka ama badeecada dalka soo gala, waynu ognahay in badeecad aad u liidata dalka la keeno oo lacag inaga baxdaa, waxaa laga yaabaa inaynu jabnaan ku doorano, laakiin waxaa jaban ayaa ka qaalisan sababtoo ah guluubka sanad kuu bixi lahaa ayaad bishii mar badaleysaa, markaa aakhiritaankii wuu ka qaalisanaanayaa guluubkii tayada lahaa ee aad qaaliga u arkeysay.

Markaa alaabta tayadeedu aad u hooseyso waxay u baahan tahey in loo sameeyo symbol, waxay u baahan tahay aqoon, khibrad iyo farsamo aad u badan iyo laboratory ku eegaan, sidoo kale Xeer iyo regulation intan ka faah-faahsan oo wax walba gaar sameeya, Matalan looxa oo kaliya ayaa u baahan in tayidiisa regulation gaar laga sameeyo, waxaa halkan la isku soo darey Xeer la yidhi waa Xeerkii Tayada iyo Kimishankii, horta institution gaar aan u xusno oo waajibaadka iyo mandatekiisana aan kala safeyno oo wixii Caafimaad ah wasaarada Caafimaadku yeelato, wixii shaqo ah ee isagu leeyahayna aan si fiican u tilmaano.

Waxaan ku raacsanahey Md. Maxamed Saalax erey bixinta xeerkan ku isticmaalnaa waxay noqoneysaa erey sharciyeed markaa hadii wax aad dadka iyo sharciga lagu adeegsan aynu halkan wuxuu keeni karaa contradiction, tusaale ereyga agab waxaa afsomaliga loo yaqaanaa qalab, halkana waxaa loo isticmaalayaa badeecad, ereyga badeecadna uu ku jiraa, markaa agab inaynu

badeecad ku badalno, waayo badeecad waa wax walba oo laga ganacsado, markaa xeer walba inaanu afsomali gaarkiisa ah wadan baa fiican ee Xeerarkeenu same language ay wada adeegsadaan waa mab'da asaasiya oo markasta Goleheena looga baahan yahay.

4. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Shaqaalahaba waxaan leeyahay ASC, horta Gudoomiye Xeerkan aniga iminkaa la ii dhiibay, waxaad moodaa habka uu u sameysan yahay Xeerkani iminka inuu la nooc yahay Xeerkii Hay'adda HIV/AIDska oo kale, waxaa ku yaala lifaaqa iyo Xeerka markaad isu eegto Hay'ad, Commission iyo Gudi iyo Commission ayaa ku qoran markaa Contradiction ayaa ku dhex jira, hay'addan magaceeda lifaaqa markaad eegto waxay ka dhigeen Somaliland Quality Agency ama Wakaalada Tayada dhowrka ee Somaliland, markaa waxay ku fiican tahay in hay'ad loo daayo oo la yidhaahdo "Hay'adda Tayo-dhowrka Qaranka" ayay ku qurux badan tahay.

   Erey bixinta waan ku raacsanahey Xildhibaankii iga horeeyay "agab" oo kale agabku wuxuu noqonayaa in la micneeyo isagoo loo eegayo Xeerarka kale ee ka hadlaya ganacsiga iyo badeecadaha, wayna ku laba celiyeen oo mar waxaa ku qoran agab waxaa loola jeedaa dhamaan badeecadaha kala duwan ee dalka yimaada, mar kalena waxaa ku qoran agabka waxaa loola jeedaa wax kasta laga ganacsanayo, markaa labadaa jeer in mid loo daayo weeye oo la yidhaahdo **Agab** "waxaa loola jeedaa shay kasta oo dalka yimaada oo u baahan in tayo-dhowr lagu sameeyo", konteenar oo kale hadii sidiisa loo daayo wuxuu noqonayaa weel oo laga daayo galka halkey yidhaahdeen.

   **Qodobka 3aad** anigu waxaan leeyahay Gudidda ha loo daayo oo komishanka ha laga saaro F/1aad halka qofnimo qaanuuneed ha loo badalo Shakhsiyad Qaanuuniya, Qodobka 7aad ee Qaab-dhismeedka waxaa ku qoran Gudidu waxay yeelanaysaa Gudoomiye, Ku-xigeen iyo Agaasime Guud waxay u egtahay murankii hay'adda HIV/AIDska oo kale ka jiray, waxa weeye hay'addhu haday noqoto Quality Control halkan Gudidda Gudoomiyeheeda waxaa fiican inay noqoto Gudi komishan oo marka la magacaabo ay iska dhex doortaan Gudoomiye iyo ku-xigeen.

   Marka waxa weeye sida la sheegayo ay noqdaa 7 qof oo madaxweynuhu magacaabo laakiin iyagu Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka iska dhex doortaan sida komishanka iyo in laga dhigo hay'ad caadiya sida hay'addaha aynu naqaano ee ay ka mid tahay Hay'adda Shaqaalaha iyo Maamul Wanaaga oo kale oo madaxweynuhu Magacaabey Gudoomiyaha, Ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud.

   ***Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa:-***

- in laga daayo 7 qof oo ay hay'addu noqoto 3daa qof ee Gudoomiyaha, Ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud iyo Shaqaalohoodii Caadiga ahaa waxay u egtahay Hay'adda Shaqaalaha, meesha laga saaro Komishanka ama ay noqdaan Komishan caadiya oo inta Madaxweynuhu magacaabo 7daa qof ay iska dhex doortaan iyagu G. iyo Ku-xigeenka, waliba tan hore ee 3da xubnood bay ku fiican tahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**-------------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
**-----------------------------------------**